### 9. Maxaa dhacaaya haddii ay natiijad saxan la heli waayo?

Waxay dhici kartaa, inkastoo baaritaanada la sameeyey oo dhan inaa yaraantaada shaki la´aan la go´aami karin. Dhamaadka baaritaanka da´da markii aan la gaaro hadduu weli shaki jiro, waxa laguu la dhaqmi doonaa sidii qof oo 18 sano ka yar oo kale. Markaas oo kale caawimaad waxaa ka heleysa xafiiska arimaha dhalinyarada.

### 10. Maxaad sameyn kartaa, haddii aa da´oo qalad ah sheegatay?

Waa inaa si deg deg ah la hadashid daryeela-haaga, xafiiska arimaha dhalinyarada iyo waki-ilkaaga. U sheeg wixii aad hadda ogtahay. Kadib da'daada mar kale aa la baarayaa, haddii aa loo bahdo, waxaa lagu marsiinayaa baaritaan dhakhtareed oo kale.

### 11. Xafiiska arimaha dhalinyarada sidee oga caawin kartaa baaritaanka da´da?

Xafiiska arimaha dhalinyarada wax kasta aad ogtahay oga waran oo ku saabsan da´daada iyo noloshaada hore. Waaraqahaaga aad heysid oo dhan tusi. Haddii aad xiriir la leedahay qoyskaaga, ayaka aad weydiin kartaa macluumaad dheeraad ah. Mararka qaarkood qoyska wuxu xafiiska arimaha dhalinyarada uu soo diri karaa dukume-enti oo caddeynaayo da´daada saxda ah.

### 12. Maxaa dhici karo, haddii aad da´daada runta ka sheegi weydid?

Haddii aad runta sheegi weydid, waxaad jebineysaa sharciga Jarmalka. Xafiiska arimaha dhalinyarada wuxuu kuu dacweyni karaan maxkamadda. Taas waxa dheer xafiiska arimaha dhalinyarada inuu kaa dalban karo inaa lacagta uu ku caawiyey oo dhan uu soo celiso.

### 13. Yaa ku caawin karo, haddii qofna uu san ku rumaysaneynin?

Haddii aad uu maleyso, inay natiijada baritaanka da´da qalad tahay, waxaad uu tagi kartaa garya-qaanad ama garyaqaan. Taas waxaa dheer inaa aadi kartid xafiiska dacwada ee caruurta iyo dha-linyarada, haddii aad dhibaato ku qabto xafiiska arimaha dhalinyarada.

### Qofka xiriiriyaha ah ee gobolka Rheinland-Pfalz

**Liiska xafiisyada arimaha dhalinyarada ee gobolka Rheinland-Pfalz**
https://lsjv.rlp.de/fileadmin/lsjv/Dateien/Aufgaben/Kinder_Jugend_Familie/Adressen/Jugendaemter_rlp.pdf

**Xafiiska dacwada ee caruurta iyo dhalinyarada**
Kaiserstraße 32 | 55116 Mainz
Teleefoonka 06131 28999-51
ama 0172 7178723 ama WhatsApp
beschwerdestelle@diebuergerbeauftragte.rlp.de
www.diebuergerbeauftragte.rlp.de

Rheinland-Pfalz
LANDESAMT FÜR SOZIALES, JUGEND UND VERSORGUNG

**Xaruunta aqoonta ajanabiga qaangaarin aan lala soconin**
Rheinallee 97-101
55118 Mainz
www.lsjv.rlp.de

Tariiqda la sameeyey: September 2018

Caddeynta sawirrada: © pict rider – Fotolia.com

Rheinland-Pfalz
LANDESAMT FÜR SOZIALES, JUGEND UND VERSORGUNG

# MEEQO JIR AYAAD TAHAY?



Macluumaad ku saabsan baaritaanka da´da ajanabiga qaangaarin oo lala soconin ee gobolka Rheinland-Pfalz



# KU SOO DHOWOW GOBOLKA RHEINLAND-PFALZ!

Hallo, أَلسَّلَامُ عَلَيْكُمْ, Maalin Wanaagsan, سلام, bonjour, ሰላም, welcome!

Jarmalka waxaad timid waalidiintaada oo ku la soconin. Sharciga Jarmalka wuxuu xafiiska arimaha dhalinyarada ku qasbayaa inuu dhammaan caruurta iyo dhalinyarada oo 18 sano ka yar iyo keligooda halkaan yimaadeen, hoy siiyo. Sidaas darteed xafiiska arimaha dhalinyarada waxaa waajib ku ah, in da´daada la ogaado. Mararka qaarkood way adagtahay sidii da´da lagu ogaanlahaa. Sidaas darteed xafiiska arimaha dhalinyarada wuxuu ku marsiinayaa nidaamka baaritaanka da´da.

Waxaa laga yaabaa inaad qabtid su´aalo farabadan oo baaritaanka da´da ku saabsan. Wargelintaan waxaa lagu talgalay inuu kaa caawiyo inaad fahantid baaritaanka da´da wuxuu yahay. Waxaa laguu sharaxayaa xuquuqdaada iyo wajibaadka ku saaran iyo waxaa lagaa jawaabi doonaa su´aalaha ugu muhiimsan.

## 1. Xafiiska arimaha dhalinyarada sidee u ogaanayaa da´daada?

Xafiiska arimaha dhalinyarada waa inaa tustid baasaboorkaada saxda ah ama dukumeenti rasmi ah tustid oo da´daada ku qoran. Waaraqahaas oo kale haddii aad heynin, xafiiska arimaha dhalinyarada wuxu ku la yeelanayaa wadahadal. Wadahadalkaas oo kale waxaa la dhahaa falanqaynta ku haboon. Mararka qaarkood kadib waxaa weli jiro shaki inaad 18 sano ka yar tahay iyo in kale. Markaas oo kale waa inuu dhakhtar baaro da´daada. Waxaa oo kale macquul ah adiga ama wakiilkaaga inaad dalbatiin baaritaan dhaktareed oo ku saabsan baaritaanka da´da.

Haddii aad wax fahmi weydid, xafiiska arimaha dhalinyarada waxaa waajib ku ah inuu kuu dalbo turjumaanad ama turjumaan. Baaritaanka da´da awgiisa waxaad wargelin kartaa hal qof aad ku kalsoon tahay.

## 2. Maxaa ku dhacaya wadahadalka ku saabsan baaritaanka da´da?

Wadahadalka waxaad ku sheegi kartaa inta sano aad jirtid. Wadahadalka waxaa lagaa wareysan doonaa arimo farabadan oo noloshaada ku saabsan. Tusaale ahaan waxaa lagaa wareysan doonaa qoyskaaga, dugsiga, goobta aad ka timid iyo safarkaaga ilaa ee Jarmalka. Labo qofood oo xirfadlayaal ah aa ku dhageysan doono iyo hadaladaada baari doono. Taas waxaa dheer inii fiirin doonaan muqaalkaaga iyo da´daada inay is leeyihiin iyo in kale. Xafiiska arimaha dhalinyarada wuxuu oo kale isticmaali karaa caddeyn dheeraad ah, siday da´daada lagu ogaado. Wadahadalka waxaa oo kale waajib ah inaa xuquuqdaada si faahfaahsan laguu sharaxo.

## 3. Sidee ayuu baaritaanka dhakhtareed u socon doona?

Dhakhtaradda ama dhakhtarka marka hore wuxuu baarayaa, jirkaaga siduu u soo koray iyo inay calaamadaha caadiga ah oo da´daada lagu garanaayo. Markaas kadib waxaa sawirrada raajada lagu baarayaa lafaha gacantaada iyo lafta xabadka iyo qoorta uu dhexeyso iyo ilkahaaga.

## 4. Ma ku qasbantahay inaad ka qaybgashid baritaanka dhakhtareed ku saabsan baaritaanka da´da?

Haa, waa inaa ka qaybgashid baaritaanka dhakhtareed ku saabsan baaritaanka da´da. Sida uu qabo sharciga Jarmalka waxaa ku saaran wajibaadka la shaqeynta. Xafiiska arimaha dhalinyarada waa inuu si faahfaahsan kuu sheego hababka baaritaanka oo dhan iyo cawaaqibka macquulka ah. Xafiiska arimaha dhalinyarada waa inuu kuu sharaxaa wixii dhici doono haddii aad diido. Baaritaanka dhakhtareed ee da´da waxaa oo keliya la sameyn karaa haddii aad ogolaashahaaga bixiso iyo wakiilkaaga hadduu raali ka yahay.

## 5. Waxaad heshay balanta baaritaanka dhakhtareed oo ku saabsan da´da. Maxay tahay inaad sameyso?

Waa qassab inaad tagtid ballanta iyo inaad joogtid wakhtiga laguu qabtay. Baaritaanka dhakhtareed waa wax adiga aad muhiim kuu ah. Haddii aad tagi weydid, xafiiska arimaha dhalinyarada wuxuu joojin karaa caawimaadda.

## 6. Maxaa dhacaaya haddii aad diido inaad ka qaybgashid baritaanka dhakhtareed?

Xafiiska arimaha dhalinyarada wuxuu joojin karaa caawimaadda. Waxaa laga yaabaa markaas kadib inaad ku qasban tahay inaa u guurtid guri dadka waaweyn lagu talgalay. Haddii aa wakhti oo la qaadan karo gudahiisa baritaanka dhakhtareed ogolaatid, caawimaadda xafiiska arimaha dhalinyarada waxay kuu sii socon kartaa ilaa aa natiijada la haayo.

## 7. Maxaa dhacaaya haddii aad 18 sano ka yar tahay?

Haddii aa ka yar tahay 18 sano, xafiiska arimaha dhalinyarada aa kaa caawinaayo arimaha hoyga, daryeelka iyo xannaanada. Tusaale ahaan waxaa la degi kartaa qoolo oo caruur iyo dhalinyaro kale ah. Haddii aad qabtid su´aalo, waxaad la hadli kartaa xafiiska arimaha dhalinyarada iyo masuulkaaga.

## 8. Maxaa dhacaaya haddii aad 18 sano ka weyn tahay?

Xafiiska arimaha dhalinyarada wuxuu kuu soo dirayaa waraaqad oo ku qoran caawimaadda in la joojiyey. Xafiiska arimaha dhalinyarada weli waxaad ka heli kartaa caawimaad, haddii aad u bahantahay daryeel ku saabsan soo koorinta social-ka adiga oo ah dhalinyaro oo qaangaarey. Markaas oo kale waa inaa xafiiska arimaha dhalinyarada ka codsatid caawimaadda lagu talgalay dhalinyaro oo qaangaarey. Xafiiska arimaha dhalinyarada waxyabahaas oo kale wuu kugu la talin karaa iyo wuu kaa caawin karaa.